
Institut des Bundes
für Qualitätssicherung im
österreichischen Schulwesen

iqs.gv.at



# MIKA-D

## Qalabka cabbiraadda ee falanqaynta kartida – Jarmalka

## Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo mas‘uuliyiinta sharciga ah

**MIKA-D**

Soomaali
(Somalisch)

**nooca**

IQS – Institut des Bundes für Qualitätssicherung im österreichischen Schulwesen
(Machadka Federaalka ee Xaqiijinta Tayada Nidaamka Iskuulada Austria)
Alpenstraße 121, 5020 Salzburg

Xuquuqda sawirka: stock.adobe.com: Seventyfour (jaldiga, p. 5/6),
Monkey Business (p. 3), Rido (p. 7)

Salzburg, 2022

**Ilmahaagu waa inuu ka qaybqaataa imtixaanka MIKA-D oo ma jeclaan lahayd inaad ogaato waxa dhabta ah ee looga jeedo taas? Xaashidan macluumaadka waxaad ka heli doontaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan MIKA-D, fasallada taageerada luuqadda Jarmalka iyo koorsooyinka taageerada luuqadda Jarmalka.**

## Waa maxay MIKA-D?

MIKA-D waxaa loola jeedaa qalabka *cabbiraadda ee falanqaynta aqoonta Jarmalka*. Iyadoo la isticmaalayo MIKA-D, macalimiintu waxay ku hubinayaan sida ugu wanaagsan ee ilmahaagu ugu hadlo luuqadda Jarmalka iyo inay fahmi karaan casharada ku baxa luuqadda Jarmalka. Waxa jira nooc loogu talagalay **heerka aasaasiga ah** ("MIKA-D Primarstufe") iyo nooc loogu talagalay **heerka sare** ("MIKA-D Sekundarstufe"). MIKA-D, dhinacyo kala duwan oo luuqada ah ayaa qofka su'aalo looga weydiiyaa waraysiga, tusaale ahaan erayada cusub iyo fahamka luqadda (macluumaad badan oo ku saabsan arrintaan ayaa ku taala bogga 5).
Imtixaanku wuxuu qaadanayaa ugu badnaan **30 daqiiqo.**
MIKA-D **maaha imtixaan** la mid ah shaqada dugsiga. Ardaydu ma helaan **wax buundo ah.**

## Maxay tahay sababta ilmahaygu u qaadanayo imtixaanka?

Natiijada MIKA-D ayaa go'aaminaysa **dallacsiinta Jarmalka ee** ilmahaagu helayo (wax badan oo ku saabsan ayaa ku yaal bogagga 2–3). Ilmahaaga waxaa lagu meelayn doonaa fasalka taageerada luuqadda Jarmalka, koorsada taageerada luuqadda Jarmalka ama fasal caadi ah. MIKA-D waxa **la isku imtixaanaa simistar kasta** haddii ilmahaagu wali u baahan yahay taageerada luqadda Jarmalka iyo haddii kalaba (wax badan oo ku saabsan ayaa ku yaal bogagga 4).

## Waxaa jira saddex natiijooyin oo kala duwan oo MIKA-D ah:

### 1. fasalka taageerada luuqadda Jarmalka

Ilmahaagu wuxuu imaanayaa fasalka taageerada luuqadda Jarmalka wuxuuna noqdaa arday aan caadi ahayn **(wuxuu qaadanayaa "aqoonsiga aan caadi ahayn"). Heerka aasaasiga ah,** ilmahaagu wuxuu baran doonaa luuqadda Jarmalka ilaa 15 saacadood usbuucii wuxuuna ku baran doonaa fasalka taageerada luuqadda Jarmalka, si isaga ama iyada ay sida ugu dhakhsaha badan u awoodaan inay si fiican u fahmaan casharrada fasalka caadiga ah. **Heerka sare** waa 20 saacadood usbuucii.

Saacadaha soo harayna, waxay ka qaybqaadanayaan fasalka caadiga ah, tusaale ahaan, fasalka "jimicsiga iyo isboortiga" ama dalxiisyada fasalka. Dugsiyada siyaabo kala duwan ayay arrintaan u maamulaan.

### 2. Fasalka caadiga ah oo leh koorso luuqadda Jarmalka ah

Ilmahaagu waxa uu imaanaayaa (ugu yaraan hal simistar) **6 saacadood toddobaadkii** koorsada taageerada luuqadda Jarmalka. Tani waxay la mid tahay **heerarka aasaasiga ah** iyo **heerka sare.** Ilmahaagu waxa uu ku jiraayaa fasalka caadiga ah saacadaha haray. Natiijadan MIKA-D, sidoo kale, ilmahaagu wuxuu ku helayaa **"aqoonsiga aan caadi ahayn".**

**Aqoonsiga "aan caadiga ahayn"**

Haddii ilmahaagu dhigto fasalka taageerada luuqadda Jarmalka ama koorsada taageerada luuqadda Jarmalka, isaga ama iyada waxay heli doonaan "aqoonsiga aan caadi ahayn". Halkan, ilmahaagu waxa uu gebi ahaanba xoogga saari karaa barashada luuqadda Jarmalka.

"Aqoonsiga aan caadiga ahayn" wuxuu shaqaynayaa **ugu badnaan 2 sano** (4 simistar). Si markaa ilmahaagu uusan ugu jirin fasalka taageerada luuqadda Jarmalka ama koorsada taageerada luuqadda Jarmalka in ka badan 2 sano. Intaa ka dib, ilmahaagu wuxuu si otomaatig ah u heli doonaa "aqoonsiga caadiga ah" - iyadoon loo eegayn natiijada MIKA-D ee ilmahaagu helo.

### 3. Fasalka Caadiga ah

Haddii ilmahaagu awoodo inuu fahmo casharka, isaga/iyada waxay galayaan fasalka caadiga ah iyagoo ah arday caadi ah **("caadiga ah").**

Ilmahaagu khasab kuma ahan inuu ku hadlo luuqad Jarmal oo aad u fiican. Xataa haddii uu leeyahay "aqoonsiga caadiga ah" ilmahaagu wuxuu helayaa **caawimaad xagga barashada luuqadda Jarmalka ah.**

**Aqoonsiga "caadiga ah"**

Waxaad helaysaa "aqoonsiga caadiga ah" ...

- haddii natiijada MIKA-D ay tahay "mid ku filan" ama
- Haddii ilmahaagu uu hore wadar ahaan 2 sano ugu soo qaatay fasalka taageerada luuqadda Jarmalka ama koorsada taageerada luuqadda Jarmalka.

**Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato taageerada luqadda Jarmalka, waxa ugu fiican ee la sameeyo waa inaad waydiiso dugsigaaga!**



## Goorma ayaa MIKA-D la isticmaalaa?

Macallimiintu waxay dad ku imtixaanaan MIKA-D …

1. si ay ugu isticmaalaan **diiwaangelinta dugsiga***
2. ama haddii ilmahaagu uu durba ku jiro fasalka takhasuska luuqadda Jarmalka ama koorsada takhasuska luuqadda Jarmalka, **hal mar simistarkiiba.** Tani waxay ka dhigan tahay: Waxaa la hubiyaa mar kasta in ilmahaagu weli u baahan yahay koorsada luqadda Jarmalka iyo in kale
3. ama haddii aad dhowaan timid Awstaria, ilmahaagu uu hadda baranayo luuqadda Jarmalka **isla markaana uu ku cusub yahay dugsi Austria ah.**

***Macluumaad loogu talagalay isqorayaasha dugsiga.**

Marka ilmahaagu uu gaaro 6 jir, waxaad ilmahaaga u raaci doontaa dugsiga cusub si aad uga soo diiwaangeliso dugsiga. Halkan ayaa lagugu waraysan doonaa si loo eego in ilmahaagu diyaar u yahay dugsiga iyo in kale. Maamulka dugsiga ayaa markaas go'aan ka gaari doona haddii MIKA-D sidoo kale lala samayn karo ilmahaaga. Haddii ay noqoto in lala samayn karo, ballan labaad ayaa loo qorshayn doonaa arrintaas.



## Maxaa ku jira imtixaanka MIKA-D?

**MIKA-D Aasaasiga ah,** dhinacyo kala duwan ayaa lagu imtixaanaa:

- **Aagga "Ereyada"** (ereyada cusub): Ilmahaaga waxa la tusi doonaa sawir weyn. Markaas waa inuu sheego waxa uu ku arkayo sawirka.
- **Aagga "Ka jawaabista su'aalaha":** Halkan ilmahaaga wuxuu u baahan yahay inuu ka jawaabo su'aalaha ku saabsan sawirkan.
- **Aagga "Ka Sheekeynta sheekooyinka sawir":** Ilmahaaga waxa la tusi doonaa sheeko sawireed, mid walbana waxa uu wataa saddex sawir. Ilmahaagu markaas waa inuu ka sheekeeyo sheekada.
- **Aagga "Fahamitaanka jumladaha":** Ilmahaaga waxaa lagu oranayaa jumlad/weedho. Isaga ama iyada waa in afarta sawir ka doorato sawirka u dhigma jumlada/weedhka.

**MIKA-D Sare,** dhinacyo kale ayaa lagu soo daraa:

- **Su'aalaha ah buuxi meelaha bannaan:** Ilmahaaga waa inuu buuxiyaa meelaha bannaan oo laba qoraal ah oo ereyo ay ka maqan yihiin.



# Ilmahaygu ma ku qasban yahay inuu wax u barto imtixaanka MIKA-D?

Ilmahaaga waa inuusan **si toos ah** wax ugu baranin imtixaanka MIKA-D. Waxaa ka fiican haddii Ilmahaaga **uu ku tababarto luuqadda Jarmalka guud ahaan.** Tusaale ahaan:

1. In lala hadlo dadka kale oo **luuqadooda koowaad ay tahay luuqadda Jarmalka.**
2. **akhri buugaag.** Ilmahaaga ku dhiirageli inuu akhriyo buugaag ku qoran luuqada Jarmalka. Haddii aad rabto, waxaad sidoo kale u akhrin kartaa ilmahaaga ama waad isla akhrisan kartaan (gaar ahaan heerka aasaasiga ah). Waydii ilmahaaga su'aalo oo kala hadal waxa ka dhacaya buugga. Waxaa sidoo kale jira buugaag badan oo Jarmal ah oo **loo turjumay luqado kale.** Haddii aadan laftaadu si fiican ugu hadli karin luuqadda Jarmalka, buugaagta ugu akhri ilmahaaga luqadaada koowaad. Taasi waxay ka caawinaysaa barashada luuqadaha kale oo dhan.
3. Isticmaal adeegyada sida **maalmaha wax-akhrinta ee maktabadaha** (sidoo kale lagu heli karo onlayn). Wax badan ka ogow websaydhyada maktabadaha ee meesha aad degan tahay.
4. **Dhagayso buugaagta maqalka ah** oo ku baxa luuqadda Jarmalka.
5. **Isticmaalka warbaahinta** luuqadda Jarmalka ah (tusaale ahaan, telefishanka, filimada, muzalzalka, cayaarha fiidiyowga ah).
6. **Isticmaalka warbaahinta bulshada** ee luuqadda Jarmalka ah (tusaale ahaan, idaacadaha, YouTube, shabakadaha bulshada, websaydhyada).



**Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan MIKA-D:**
https://www.bmbwf.gv.at/Themen/schule/schulpraxis/ba/sprabi/mika_d.html

**Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fasallada taageerada luuqadda Jarmalka iyo koorsooyinka taageerada luuqadda Jarmalka:**
https://www.bmbwf.gv.at/Themen/schule/schulpraxis/ba/sprabi/dfk.html

**Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan ha ka waaban inaad na soo wacdo: +43 662 620088-3600 ama u qor iimayl: MIKA@iqs.gv.at.**